


## Maxaan ula shaqeeyneeynaaa dhanka SchoolsPlus?

Waxaan ka shaqeeyneeynaa kordhinta ka qeybgalka qoyska iyo dhalinyarada innagoo si firfircoon u qorsheyneyna guul.

La shaqeynta howlgalayaasha, SchoolsPlus waxay bixisaa oo kor u qaaddaa barnaamijyo iyo adeegyo kala duwan oo ka jira goobaha iskuulka, oo ay kamid ahaan karaan

- Barnaamijyo wacyigelin iyo hagid isugu jira
- Naadiyada ka caawiya ardayda waxbarasshada iyo taageero shaqo
- adeegyada caafimaadka (takhtarka caafimaadka dhimirkha, isuduwaha caafimaadka dhalinyarada, dhakhtarka carruuta)
- Booliska bulshada
- Barnaamijyada quraacda, fasallada nafaqeeynta, jardiinooyinka beesha
- Xarumaha sanadaha hore
- kooxaha dhalinyarada (tusaale, fanka, dhaqanka, GSA)
- Taageerada waalidnimada (tusaale, fasallo, kooxaha bulshada)
- Barnaamijyada madadaalada (dugsiga ka dib, fasaxa Maaro, xagaaga)



## Schools Écoles Plus

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan SchoolsPlus ee Nova Scotia la xidhiidh

Iskuduwaha SchoolsPlus  
Adeegyada Ardayga, Waaxda Waxbarashada  
yo Horumarinta Carrurta

SchoolsPlus Coordinator  
Student Services, Department of Education  
and Early Childhood Development

2021 Brunswick Street  
Halifax, NS B3K 2Y5

(902) 424-3429  
[schoolsplus.ednet.ns.ca](http://schoolsplus.ednet.ns.ca)

# Schools Écoles Plus

NOVA SCOTIA / NOUVELLE-ÉCOSSE

ISLA WADA SHAQEYN HEYADO KALA DUWAN OO  
KU WAJAHAN TAAGEERO BUUXDA EE DHANKA  
CARURTA IYO FAMILKABAH

wacyigelinta guul  
sanadaha firfircoon  
hore caafimaad  
soo dhaweyn  
daryeeliid  
qoyska is dhexgalid  
wada shaqeyn  
bulshada la isugu  
dhacaqan yimaado  
howl wadaag  
taageero wwadaaga  
la heli karo shaqooyinka  
qorsheynta jiilaalka  
caruur  
iskuulka kadib



# Himilada SchoolsPlus waa in dugsiyadu noqdaan xudunta bulshada, meel ku habboon adeegyada la gaadhsiiyo qoysaska.

SchoolsPlus waxay u sahlaysaa xirfadlayaasha inay iska kaashadaan magaca carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska. Qoysaska waxa loogu adeegaa meel soo dhawayn leh, meel la heli karo—dugsi ku dhex yaal bulshadooda. Adeegyada laga bixiyo goob kasta oo SchoolsPlus ah ayaa ixtiraamaya oo wax ka qabta baahiyaha gaarka ah ee bulshada.

Goob kastaa waxay leedahay guddi la-talin heer gobol ah oo wakiil ka ah waaxyaha dawladda ee kala duwan, sida Caddaaladda, Caafimaadka iyo Fayo-qabka, Adeegyada Bulshada, iyo Waxbarashada iyo Horumarinta Carruurta, iyo sidoo kale ururada bulshada. Guddiyadan la-talinta ayaa gacan ka geysta sidii loo ogaan lahaa daldaloolada

## Sidee SchoolsPlus u wanaajiyaa bixinta barnaamijyada iyo adeegyada ardayda iyo qoysaska?

### SchoolsPlus wuxuu bixiyaa

- adeeg bixin dhamaystiran, iskaashi, midaysan
- Wadaagista maclummaadka iyo agabka u dhexeeya wakaaladaha
- adeegyo waqtiveysan oo waxtar leh
- La xisaabtanka iyo isticmaalka hababka ugu wanaagsan ee caddaynta ku salaysan
- adeegga ka baxsan maalinta dugsiga
- Awood-dhisidda
- Iskuullada qoyska ku habboon

SchoolsPlus waxay kor u qaadaa isticmaalka qalabka dugsiga ee ardayda, qoysaska, iyo bulshada iyada oo loo marayo

- shaqada bulshada, caafimaadka, cadaalada, madadaalada, iyo adeegyada caafimaadka dhimirka ee laga bixiyo goobta dugsiga
- Xarumaha sanadaha hore, xarumaha ilaha qoyska, iyo xarumaha caafimaadka dhalinyarada ee ku yaala dugsiyada dhexdooda

## Siduu u shaqeeyaa SchoolsPlus ?

Goobaha SchoolsPlus waxaa taageera fududeeyaha iyo shaqaalaha wacyigelinta bulshada. Waxay u dhaqmaan sidii isku xirayaasha dugsiga iyo bulshada waxayna u doodaan, isku dubaridaan, oo ballaariyaan adeegyada ardayda iyo qoysaska. Waxay ka caawiyaan qoysaska inay maraan nidaamka oo ay helaan adeegyada ay u baahan yihiin. Dhakhaatiirta caafimaadka dhimirka ee dugsigu waxay ku yaalaan qaar ka mid ah dugsiyada SchoolsPlus ka qaybqaata si ay u siiyaan taageero iyo daawaynta ardayda la kulma.

## Yuu u adeegaa SchoolsPlus?

SchoolsPlus wuxuu u adeegtaa dhammaan carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska, iyo gaar ahaan kuwa u baahan taageerooyin iyo adeegyo dheeraad ah.



## Sidee qoysasku wax uga helaan SchoolsPlus?

U gudbinta SchoolsPlus waxay ugu horayn ka timaadaa maamulaha iyo kooxda qorsheynta ardayda dugsiga. Bixiyeyaasha adeegga, ardayda, iyo qoysasku waxay sidoo kale la xiriiri karaan fududeeyaha SchoolsPlus si uu u sameeyo tixraac.



Fududeeyaha SchoolPlus ayaa markaa lagu martiqaadaya kulamada Kooxda Qorshaynta Ardayga dugsiga sida loo baahdo. Heerka jawaabtu waxay ku xirnaan doontaa heerka baahida la aqoonsaday waqtiga gudbinta. Mararka qaarkood tani waxay ka dhigan tahay wadaagid fudud ee maclummaadka xiriirka si loogu xiro qoysaska adeegyada ay u baahan yihiin. Marar kale, fududeeyuhu waxa uu qabanqaabin karaa kulan uu la yeesho tiro ka mid ah adeeg bixiyayaasha si uu qoys ula sameeyo qorshe hawleed. Waxaan ugu yeernaa qorshe-hawleedkan qorshe adeeg oo dhammaystiran.

Ardaydu waxay u baahan karaan qorshe adeeg oo dhammaystiran marka

- Waxay u baahan yihiin in lagu xidho adeegyo badan
- Waxaa jira caqabado ka hortagaya helitaanka adeegyada
- adeegyo kala duwan ayaa la bixiyaa, laakiin waxay weli u baahan yihiin adeegyo dheeraad ah si ay u guuleystaan.